Caawi sidii loo ogeysiiyo Hayada Caafimaadka Dadweynaha Boston iyo Magaalada Boston iyo habka qorshaynta ee ku saabsan xaaladaha la xiriira ee Duqa magaalada Martin Walsh ku dhawaaqay in midab takoorka yahay dhibaato caafimaad oo dadweyne.

Dulmarka guud in midab takoorka inuu yahay dhibaato caafimaad ee dadweyne

Midab takoorku waxuu khatar ku yahay caafimaadka iyo nabadgelyada dadwaynaha . Waxay saameysaa marin u helka ilaha caafimaadka dhiirrigeliya, sida shaqooyinka wanaagsan iyo guryo caafimaad qaba, iyo cunto caafimaad leh oo la awoodi karo. Cadaadiska daba dheeraada wuxuu kaloo leeyahay saameyn caafimaad. Khibradda midab takoorka sida marka laga daba raaco dukaamada, lagu weydiiyo xaqa aad u leedahay inaad meel joogto ama cabsi markaad kala kulanto sharci fuliyaasha, dhammaantood waxay sababi karaan cadaadis joogto ah iyo caafimaad xumo.

Dadka deggan Boston badankood waa dadka midabka leh, Boston wali waxaa ka jira kala soocid midab takoor ah. Waxaa jira kala duwanaansho joogto ah ku saabsan natiijooyinka caafimaadka ee Madowga iyo isbanishka Boston degan marka la barbardhigo Cadaanka Boston degan tilmaamayaal caafimaad oo badan oo ay ku jiraan natiijooyinka dhalmada, neefta, sonkorowga, dhiig-karka, iyo xaaladaha kale ee daba dheeraada. Kala soocida midab takoorku waxay keentaa kala duwanaansho weyn oo ku saabsan natiijooyinka caafimaadka oo ku xiran xaafada aad ka degan tahay magaalada . Meesha qofku ku nool yahay waxay sidoo kale saameyn ku yeelanaysaa helitaanka fursado - waxbarasho, guriyeyn, shaqo, gaadiid, madadaalo, helitaanka cunto caafimaad leh iyo daryeel caafimaad - cawaaqib kale oo toos ah oo ka dhashay kala sooca midab takoorka.

Cudurka faafa ee COVID-19 wuxuu ka sii darsiisay dhibaatadii horey ujirtay ee sinaan la'aanta ayna sababtay midab takoor taasoo keentay isku dheelitir la'aanta, kiisaska COVID-19 iyo natiijooyinka liita ee u dhexeeya dadka degan magaalada Boston ee Madow iyo isbanish iyo dhibaatooyin la xiriira bulshada iyo dhaqaalaha.

Caddaalad isir waa abuurista iyo xoojinta firfircoonaanta siyaasadaha, dhaqannada, dabeecadaha iyo ficilada soo saara awood sinnaan, marin u hel, fursad, daaweyn iyo natiijooyinka dhammaan dadka iyadoon loo eegin jinsiyad.

Dawladda Magaalada Boston waxay mar labaad balan qaadaysaa wax ka qabashada saameynta midab takoorka ku leeyahay nolosha dhammaan deriskeenna iyo sida ay u saamaynayso caafimaadka guud ee Magaalada.

Duqa magaalada Martin J. Walsh wuxuu u jiheeyey Xafiiska Caafimaadka ee Duqa Magaalada iyo Adeegyada Aadanaha Heyada Caafimaadka Dadweynaha ee Boston iyo dhammaan waaxaha Magaalada inay horumariyaan sideed xaladood ee soo socda si loola dagaallamo midab takoorka iyadoo ah dhibaato caafimaad dadweyne kana dhalanayso sinaan la'aan caafimaad:

- Abuur **xal siyaasadeed si loo baabi'iyo midab takoorka nidaamsan iyo caqabadaha** caafimaadka dadweynaha adoo qiimeynaya siyaasadaha hada jira lana adeegsanayo xogta si loo wado isbedelka.
- **Samee qorshe "Sinaanta Caafimaadka Boston ee Hada"** oo ay ku jiraan ujeedooyin cadcad iyo goaano la qiyaasi karo si wax looga qabto sababaha asaaska u ah sinaan la'aanta ee sababa kala duwanaanshaha natiijooyinka caafimaadka.
- **Warayso bulshooyinka la midab sooco** si loo aqoonsado dhibaatooyinka, xallalka iyo taageerida go'aanka bulshada ka yimid.
- Waxaa loo baahan yahay **warbigxinta dadweynaha ee ku saabsan xog isir iyo qoomiyad taasoo diiwaangeliya sinaan la'aanta caafimaadk**a ee Boston adoo la shaqeynaya isbitaalada iyo Dowlada wadaaga ee Massachusetts si loo helo macluumaadkan muhiimka ah.
- **Falanqee xogta si fiican loo fahmo isku xirnaanshaha bulshada, arrimaha deegaanka iyo dabeecadaha** oo gacan ka geysta saameynta midab takoorka iyo helitaanka shaqooyinka, cuntada, guryaha, gaadiidka iyo waxbarashada.
- Hagaaji **helitaanka kahortaga iyo daaweynta taasoo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba karti u leh.**
- Samee adeegyo iyo **barnaamijyo wax looga qabanayo saameynta xun ee sinaan la'aantani ku yeelatay** dadwayne gaar ah.
- **U dood heer gobol iyo heer federaal wixii ah siyaasadaha iyo fursadaha maalgelint**a ee toos ula dagaallama midab takoorka nidaamsan.

Martiqaadkeena

Codsigan Macluumaadka ah (RFI) waa in laga codsado gundhig gala Boston's sideed xeeladood si wax looga qabto midab takoorka caafimaadka dadweynaha. RFI waa mid ka mid ah qaabab badan oo dadka deggan Boston ugu qeyb qaadan karaan, gaar ahaan kuwa hadda ay saameeysay midab takoorka isla markaana taariikh ahaan laga takooray go'aan qaadashada dowladda. Waxaan codsaneynaa macluumaadka dadka oo qayb ka ah jawaabahaaga si aan u hubinno inaan gaarno kuwa ugu badan ee ay saameysay.

Midab takoorka ayaa leh saameyn la qiyaasi karo, oo ay ku jiraan dakhliga, caafimaadka iyo isdhexgalka hay'adaha iyo dowlada iyo wakiilada kale. Waxaan soo dhawaynaynaa faallooyinkaaga ku saabsan sida aan ku gaari karno reer Boston isir iyo sinnaan leh.

Waxaan sidoo kale kugu martiqaadeynaa inaad kaqeyb gasho kulan onlayn ah kuna saabsan Midab takoorka Dhibaatada ku hayo Caafimaadka Dadweynaha ee laqaban doono Oktoobar. Si lagugu ogeysiiyo Gudiga Caafimaadka ee Boston, fadlan imayl u dir boardofhealth@bphc.org danahaaga.

LIFAAQA 1: JAWAABAHA

Ururada (tusaale. Bulsho ku saleysan, Iimaan ku saleysan), Isbaheysiyo, Hay'ado iyo Ganacsiyo si toos ah ula falgala ama ugu adeega bulshooyinka la takooro taariikh ahaan: U soo gudbi jawaabaha su'aalaha hoose boardofhealth@bphc.org ee aragtidaada ku aaddan boston oo midab kaliyacaddaalads ah. Fadlan hubso inaad gelisid "RFI" mawduuca imaylkaaga. Soo gudbinta waa inaysan ka badnaan 3 bog waxaana lagu soo gudbin karaa Chinese, Cabo Verdean Creole, Haitian Creole, ingilish, Portuguese, Somali, Isbaanish iyo Fiyatnaamiis

WAQTIGA UGU DAMBEEYA EE JAWAABAHA: ARBACADA, OKTOOBAR 7, 2020

- **Hordhac (1/2 bog):** Fadlan soo bandhig ururkaaga iyo dadweynaha/xaafadda aad u adeegto adoo ka jawaabaya su'aalaha soo socda:
    - Magaca ururkaaga
    - Qeex macluumaadka juqraafiyeed iyo isir/qoomiyad iyo macluumaad ee tirada dadka aad u adeegayso.
    - Qeex macluumaadka juqraafiyeed iyo isir/qoomiyad iyo macluumaad shaqaalahaaga.
    - Waa maxay waaxda ururkaagu ugu horrayn saamaynayo? (guryaha, shaqooyinka, cuntada, iimaanka, xuquuqda soogalootiga, deegaanka, caafimaadka maskaxda, iwm.)
    - Waa maxay ujeeddada/himilada ururkaaga?

- **Aragtida (2 ½ bog):** Fadlan soo jeedi aragtidaada ku aaddan reer Boston oo isir iyo caddaalad ku dhisan adoo ka jawaabaya mid ama in ka badan oo ka mid ah su'aalaha hoose.
    - Shaqo noocee ah ayaad qabanaysaa taas oo wax ka qabanaysa midab takoorka dhibaatada caafimaad ee dadweynaha?
    - Shaqo noocee ah ayaad soo jeedin laheyd si aad wax uga qabato sideeda istiraatiijiyad ee uu dejiyay Duqa Magaalada Martin J. Walsh si loola dagaallamo midab takoorka iyada oo ay tahay dhibaato caafimaad oo dadweynaha ah? (Lifaaqa 2)
    - Ma jiraan wax ka dhiman sideed istiraatiijiyadood ee kor ku xusan oo lagama maarmaan u ah la dagaallanka midab takoorka iyadoo ah dhibaatada caafimaad ee dadweynaha?
    - Fursado noocee ah ayaad ku aragtaa shaqadaada si aad ula shaqeyso BPHC iyo Magaalada Boston?

Loogu Talo Galay Shakhsiyaadka Deggan: La wadaag fikradahaaga iyo waaya-aragnimadaada foomka onlaynka ah mid ka mid ah luuqadahan: Chinese, Cabo Verdean Creole, Haitian Creole, ingilish, Portuguese, Somali, Isbaanish iyo Fiyatnaamiis. **Ururada -** fadlan u soo dir xubnahaaga foomkan si aad u hubiso inaan ka maqalnay tiro badan oo ka mid ah dadka deggan Boston.

WAQTIGA UGU DAMBEEYA EE JAWAABAHA: ARBACADA, OKTOOBAR 7, 2020

LIFAAQA 2: Amarka Fulinta ee Duqa Martin J. Walsh oo ku dhawaaqaya Midab takoorka iyo Dhibaatada Caafimaadka Dadweynaha ee Degdega ee kjirta Magaalada Boston